



do **1** thing

Himilada Do 1 Thing waa inay ku dhaqaajiso ashkhaasta, qoysaska, ganacsiyada iyo bulshadu inay u diyaargarobaan halisaha oo dhan ooy noqdaan qaar masiibada u adkaysta.

YOOLKA: Awood u yeelo inaad si badbaado leh u buuxiso baahiyaha aasaasiga ah marka korontadu go'do.

Korontada

Koronto gu'istu waa xaalad gurmada ah taasoo inta badan ku xigta xaalad gurmada oo kale—sida haarikaan, tornaado, ama duufaan jillaaleed. Taasi waxay u sii yeeshay ahmiyad gaar ah in hore loo sii diyaargarobo. Waxaan ku tiirsanahay korontada kulka, cuntada, iyo baahiyaha caafimaad. Xiitaa qalab naqaseed badani wuxuu u baahan yahay koronto si uu u shaqeeyo.

Dooro mid kamida waxyaalahan soo socda si aad u samayso bishan si aad si fiican ugu diyaargarawdo:

- Tooshyada ku diyaarso meel dhaw hubina beetariyada tooshashka iyo raadiyawga.**

Marka laydhka damo, hababka ugu badbaado badan ee laydh degdeg ah loo heli karaa tooshka ama laambadaha beetariga ku shaqeeya. Ku ilaali tooshka beetariyo cusub dhawr meelood gurigaaga oo idil una hubi inay si fiican u shaqaynayaan si joogto ah. Markasta hayso beetariyo dheeraad ah. Ka fikir iibsiga tooshka dib loo dabayn karo kaasoo dabaysnaan doona ilaa la isticmaalo.

- Kasbo oo baro sida si badbaado ah loogu isticmaali karo dab-dhaliyaha fudud.**

Adoo isticmaalaya dab-dhaliye si sax ah u xidhiidhsan oo xajmi kaafi ah leh muddada uu dabku maqan yahay waxay dhimi ama ugu dhawaan meesha ka saari raadka gu'ista korontadu ku leedahay noloshada. Kahor intaanad iibsan dab-dhaliye, kala hadal korontoole xajmiga iyo nooca aad u baahan tahay. Ka fikir waxaad rabto in dab-dhaliyahaaga aad ku qabsato. Dab-dhaliyayaasha waxa loo isticmaali karaa in cuntada qabaw lagu ilaaliyo, lagu siiyo iftiin iyo koronto tilifoonada iyo tilifishanka, moofada korontada afuufayaasha iyo turayaasha.



Marka kasta ku daa dab-dhaliyaha debadda. Waligaa ha ku isticmaalin dab-dhaliye gudaha guriga, guri hoose, ama geeraash. Waligaa ha isticmaalin xadhig dab-dhaliye ka yimi si aad ugu tallaasho mareeg gurigaaga ka jirta.

Habka ugu fiican eed u isticmaali karto dab-dhaliyaha fudud si aad ugu xidhiidhiso gurigaaga waa inaad isticmaaso damiye-danshe beddele ah oo uu rakibay korontoole sharciiyeysan. Tani waxay ka ilaalin korontadu inay ku xad dhaafto xadhkaha korontada gurigaaga. Waxay sidoo kale ku ilaalin korontada dab-dhaliyahaaga ka timaad inay dib u soo dhexmarto khadadka korontada, taasoo dhaawici karta ama diliba karta dadka ka shaqaynaya khadadka korontada, ama waxay si lama filaan ah dib u tamarayn kartaa khadadka dhulka lagu danab tiray gurigaaga agtiisa. Waxa sidoo kale dhici karta inaad qalab si toos ah ugu xidho godadka ka baxa dab-dhaliyaha, laakiin hubso in wixii xadhko ka farcamaa uu dhererkoodu sax yahay ood cabbirto si aad u xalliso baahida korontada.



Abuur qorshe koronto gu'is – go'aanso waxa aad qaban karto kahor, inta lagu jiro iyo kadib gu'ista korontada si aad u yarayso saamaynta qoyskaaga ay ku leedahay.

Kahor gu'ista korontada:

- Ku buuxi meelaha madhan qaboojiyaha weel biyo kujiraan. Biyaha fadhiistaa waxay baro bixin hawada waxay ku ilaalin cuntadu inay muddo dheer jirto. Xasuusnaw inaad kaga tagto meelo bannaan weelka si barafku ugu fido.
- Ku hayso ugu yaraan hal tilifoon oo leh xadhiga qaybta gacanta gurigaaga. Tilifoono badan oo bilaa xadhig ahi ma shaqeeyaan korontadu markay go'do.
- Haddaad leedahay albaab geeraash furaha ootomaatigga ah, baro sida loo isticmaalo sii daynta xagga gacanta una fur sida gacanta loola tagayo albaabka geeraashkaaga.
- Isku day inaad ku ilaaliso taangiga naqaska baabuurkaagu inuu kala-badh yahay ugu yaraan. Qaar badan oo kaalmaha naqaska ahi shaqayn maayaan marka korontadu go'do. Buuxi taangigaaga haddii duufaan wayn la saadaaliyo.
- Hubso inaad baabuur leedahay ama xadhiga ifiyaha fiishta ee tilifoonkaaga gacanta.
- haddaad isticmaasho qalab caafimaad oo gaar ah sida ogsijiin dhaliyayaasha ama qalabka dhiigga sifeeya, ogaysii shirkaddaada korontada.

Kadib gu'ista korontada:

- Ka saar fiishta qalabka korontada iyo elektarooniga. Marka korontadu soo laabato, waxa jiri kara jacjac taasoo dhaawici karta qalabka korontada ee waawayn ama elektarooniga nugul.
- Ha furin tallaagadaha ama qaboojiyayaahsa haddayna lama huraan ahayn. Tallaagadda aan la furin waxay ku haynaysaa cuntada qabaw ugu yaan 4 saac, qaboojiyaha aan la furina wuxuu ku haynayaa cuntada barafaw ugu dhawaan 24 saac.
- Isticmaal raadiyaw beetari ku shaqeeya si aad war u qabto.

Badbaada koronto gu'ista

- Daadi cuntada haddii heerkulka tallaagaddaadu ka bato 40 digrii in kabadan 2 saac.
- Ka dheeraw khadadka korontada dhulka la galiyey iyo wixii ay taabtaan sida dayrarka am dhismayaasha.
- Waligaa baabuur ha dul kaxayn koronto dhulka la gashay; waxa dhici karta inay tamaraystaan.
- Waligaa ha isticmaalin dhuxul ama solaha naqaska dhisme gudihii. Waxa dhici karta inuu kugu bato kaarboon mono-ogsaydh.
- Haddaad ka fursan waydo isticmaalka shamac, u isticmaal si badbaado leh. Waligaa ha ka tagin shamaca oo shidmaya.